

Ref: GSS/Mof/-02/2/2021

Date: 03/07/2021

**Subject: Miisaaniyadda DGG ee Muddada u dhaxaysa 1da Jannaayo  
ilaa 31<sup>ka</sup> Disembar Sanad Maaliyadeedka (Fiscal Year 2022).**

**Mudane Wasiir,**

Wasaaradda Maaliyadda DGG waxay idinku wargelineysaa in la bilaabay geeddi-socodka ' diyaarinta Miisaaniyadda sanad-Maaliyadeedka dhammaanaya 31 Disembar 2022.

Sdaa darteed, waxaa dhammaan Wasaaradaha laga codsanayaa in ay ogaadaan in Miisaaniyadooda ugu badan ay tahay sida ku qoran Lifaaqa laad ee ku lifaaqan wareegtadan & in ay soo gudbiyaan qiyaasaha kharashaadka ay u baahan doonaan muddada u dhaxaysa 1 da Jannaayo ilaa 31<sup>ka</sup> Disembar 2022. Miisaaniyadaha ayaa loo qoondeyn karayaa xisaab kasta oo Miisaaniyadeed (Budget line) laakiin Miisaaniyadda Wasaaraddu waa in aaney ka badan Miisaaniyadda ugu badan ee loo qoondeeyey (MDA Ceiling). Kharashaadka kale oo intaa ka badan oo la soo jeedinayo/dalbanayo waa in gooni toos loo qoraa waana in faahfaahinta loogu qiil sameynayo kharashaadka cusub la bixiyaa/faahfaahiyaa, eeg Foomka 6aad.

Sida ay tilmaameyso Qaybta 23aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha/Dowladda ee soo baxay 2018, Wasaaradaha ayaa hadda laga doonayaa in Qorshe-sanadeedka Dakhliga iyo Kharashaadka u soo gudbiyaan Wasiirka Maaliyadda ugu dambeyn 30 maalmood guduhood (eeg Jadwal Miisaaniyadeedka/Budget Callender).

Codsiyada Miisaaniyadeed ee la soo gudbiyo waxaa qiimeyn doona Wasaaradda Maaliyadda, oo la tashaneysa Wasaarad/Hay'ad kasta, iyada oo lagu xisaabtamayo qiyaasta dakhliga la saadaalinayo in la heli karo.

Wareegtadan Miisaaniyadeed ee halkaan ku lifaaqan waxaa macluumaadka la gelinayo, ka caawinaya Wasaaradda Maaliyadda. Wareegtada Miisaaniyadda waxaa kale oo la socda foomamka

loo adeegsanayo soo-gudbinta qiyaasaha Miisaaniyadda. Foomamka waa in loo diyaariyaa si waafaqsan tilmaamaha ay bixinayso wareegtadan, waana in loo soo gudbiyaa Wasiirka Maaliyadda ugu dambeyn 20<sup>th</sup> August 2021.

Maadaama dakhliga soo gala DGG uu xaddidan yahay. Wasaaradaha/Hay'adaha waxaa laga codsanayaa in marka ay soo gudbinayaan Miisaaniyadhooda ay ku soo sheegaan sida ay kharashaadku ugu kala muhiimsan yahay.

Go'aanka ugu dambeeya ee la xiriira Miisaaniyadda DGG ee 2022 waxaa qaadanaya Baaramaanka DGG.

Fadlan la soo xiriir Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda, Telefoonadan 0615556910/0617952251, ama Email:

[Abdiaziz.husein@galmudugmof.so](mailto:Abdiaziz.husein@galmudugmof.so)/[Mohamud.adan@galmudugmof.so](mailto:Mohamud.adan@galmudugmof.so)

haddii aad u baahato gacansiin.

Mahadsanidin,

  
Farxaan Cali Maxamuud

Wasiirka Maaliyadda

Dowlad Goboleedka Galmudug

